

Isbadel lagu samaynaayo SchoolChoice iyo Universal Preschool (UPK) Colorado

Waalidka/Masuulka Qaaliga Ahaaw,

Janaayo 3, 2023

DPS waxay kaashanaysaa Colorado Department of Early Childhood (“CDEC”, Waaxda Dhalaanka ee Colorado) si loo sii wado gaarsiinta barnaamijkeeda Waxbarashada Dhalaanka arday iyo qoysas badan.

Dugsiga xanaanada caruurta, sidoo kale loo yaqaan Waxbarashada Hore ee Carruurnimada ama ECE, waxay ka caawisaa carruurta yaryar inay kobcan fahan ahaan, bulsho ahaan iyo dareen ahaan. Aasaaskan xooggani wuxuu udiyaariyaa iyaga inay galaan sanaha dugsiga hoose si guul leh ayna kuu sii raaxaystaan waxbarashadooda.

Hanaanka SchoolChoice ee qoysaska ardayda ECE ayaa aad uga duwanaa doona sanadihii hore sabab la xariirta in Codbixiyaasha Colorado ay u codeeyeen [Proposition EE \(Hindise-Sharciyeedka EE\)](#) sanadkii 2020 kaasoo Gudoomiye Polis uu saxiixay sharciyadiisa bishii Abriil 2022. Barnaamijka cusub ee gobalka, Universal Preschool (UPK) Colorado, qoysaska ayaa raaci doona hanaanka cusub ee codsiga iyo bakhtiyaa-nasiibka ee CDEC si ay u waafajiyaan cunugooda dugsiga barbaarin oo u qalma ayagoo ka xulanaaya in ka badan 80 dugsiga oo ka tirsan DPS iyo dugsiyada gaarka loo leeyahay. Waxaa jira waxyaabo badan oo aan wali la ogayn, marka qoysaska waxaa lagu boorinayaa inay codsadaan xiliga ugu horeeya si ay uga guul gaaraan hanaankaan cusub.

Fadlan qaad talaabooyinka soo socda si aad u codsato barnaamijka ECE ee DPS:

ECE3:

- 1) Ka codso webseedka DPS SchoolChoice oo ah <https://dps.schoolmint.net/> inta u dhexaysa Janaayo 13 iyo Febraayo 14 (wuxuu xirmayaa 4:00 pm). Dooro ilaa 12 barnaamij oo aad dooneyso inaad codsato.
- 2) Ka codso webseedka UPK inta u dhexaysa Janaayo 17 iyo Febraayo 15 si aad u eegto haddii aad u qalanto maalgelin dheeri ah.

ECE4:

- 1) Ka codso webseedka DPS SchoolChoice oo ah <https://dps.schoolmint.net/> inta u dhexaysa Janaayo 13 iyo Febraayo 14 (wuxuu xirmayaa 4:00 pm). Halkaan kuma dooran doontid dugsiyada-dookhyadaada dugsiga ayaan la qori doonin ilaa inaad buuxiso maahee talaabada xigta.
- 2) Ka codso webseedka UPK inta u dhexaysa Janaayo 17 iyo Febraayo 15 si aad u aad u doorato dugsiyada aad doonayso inaad codsato.

Fadlan ogoow, hanaanka cusub ee gobalku dhaqan gashay ayaan lahaan doonin liiska sugitaanka ee codsiyada ECE4 si kaduwan nidaamka bakhtiyaa-nasiibka ah ee DPS ECE. Maadaama aan nahay haayad dawladeed waa qasab inaan ku dhaqanno barnaamijka cusub ee CDEC, aana raacno tasmada uu baxsho gobalku.

Xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka sanad jirsaday ee Universal Preschool (UPK) Colorado ayaa laga heli karaa <https://cdec.colorado.gov/colorado-universal-preschool>. Waxaan sugaynaa inaan xog idin siino marka xog cusub soo baxdo, iyo inaad safarka waxbarashada ilmahaaga ka biloowdo halkaan DPS. Haddii aad qabto wax su'aalo ah inta lagu jiro hanaanka codsiga cusub, fadlan kala xariir CDEC lambarka (800) 799 5876.

Khayrbadan ayaan idiin rajaynaynaa,

Priscilla Hopkins

Waaxda Waxbarashada Dhalaanka